

# Taageerada aad u baahantahay marka aad ugu baahida badantahay.



## Ku saabsan Adeegga.

Laanta Adeegga Toronto Community Crisis Service (TCCS) waxay bixisaa taageero caafimaadka dhimirka ah waxaana si toos ah u bixiya laanteeda shaqaalaha wareega ee la tacaala xaaladaha degdegga ah si bilaash ah, halka xogtaadana ay ahaan doonto mid asturan. TCCS waxay taageertaa dadka ku dhaqan Toronto ee da'doodu tahay 16 sano ama ka weyn, waxana la heli karaa 24 saac maalintii, toddoba maalmood asbuucii.

Marka aad wacdo 211 ama 911 si aad taageero ugu hesho xaalad adag oo caafimaadka dhimirka ah, TCCS waxay u soo dirtaa shaqaale la tacaala

aaladahan adag oo loo tababaray caafimaadka dhimirka iyo ka jawaabista xaaladaha adag goobtaada.

Way kula hadli doonaan si ay u fahmaan taageerada aad u baahan tahay. TCCS way kula shaqeyn doontaa si ay u hesho siyaabo ay uga falceliso caqabadaahaaga caafimaadka dhimirka.

Shaqaalaha ka hortagga xaaladaha adag ee TCCS waxay xidhtaan xadhkaha iyo kaadhahka aqoonsiga. Astaanta magaalada Toronto ayaa ku taal dhammaan gawaarida TCCS, oo ay la socdaan Astaamaha danwadaagta bulshada.

## Saacadaha Shaqada.

TCCS waxay adeeg fidisaa 24/7 guud ahaan magaalada Toronto. Wac 211 si aad u hesho TCCS.

Wax badan ka baro

[toronto.ca/CrisisService](https://toronto.ca/CrisisService)